


Ma waxaad dalbanaysaa Kaarka Caafimaadka ee Ontario

Ontario ku soo Dhowoow!



Haddii aad tahay qof Ontario degan, haysashada kaarka caafimaadka waxay micnaheedu tahay in xaq aad u leedahay adeegyada ay bixiso Qorshaha Daryeelka Caafimaadka ee Ontario [Ontario Health Insurance Plan [OHIP]].

Haddii aadan lahayn kaarka caafimaadka ee Ontario, waa in aad ka dalbataa mid ka mid ah xarumaha ServiceOntario. Laakiin ka hor inta aadan tagin xarunta si aad u dalbato, fadlan qaad ama raac talaabooyinkan soo socda:

1. Booqo ServiceOntario.ca/HealthCard:

- Soo daabac oo buuxi foormka Diiwaangelinta Caymiska Caafimaadka Ontario (foorm 0265-82)
- Dib-u-eeg Liistiga Dukumentiga Caymiska Caafimaadka Ontario (foormka 9998E-82) si aad u aragto maxay yihiin dukumentiyada la iska doonayo (dhinaca dambe ka fiiri qoraalka oo dhan)

2. Booqo ServiceOntario.ca/FindServices si aad u hesho xarunta kuugu dhow ee ServiceOntario

3. Foormka diiwaangelinta oo dhammaystiran iyo dhammaan dukumentiyada la iska doonayo oo dhan horey uqaad oo geey xarunta ServiceOntario.

Dokumentiyada la iska doonayo

- **Liiska 1 - Caddeyn Dhalashada Kanadiyanka ama Sharciga Degnaanshaha oo aad OHIP-Xaq ugu yeellanayso.**
Liistiga dukumentiyada wuxuu caddaynayaa in aad tahay Muwaadin Kanadiyan ah ama aad haysato shariciga wadanka oo aad xaqna u leedahay in aad hesho caymiska caafimaadka Ontario.
- **Liiska 2 - Caddeyn ah in Ontario aad Degan tahay**
Dokumentiyada ee liiskan waxaa ku qoran magacaaga iyo cinwaanka guriga ee aad hadda degan tahay oo wuxuu caddeynayaa in degaankaaga koowaad uu yahay gobolkan Ontario.
- **Liiska 3 - Aqoonsiga wax Taageerayo**
Dokumentiyada taageerayo ee liiskan wuxuu caddeynayaa magacaaga iyo saxiixaaga.

Liis kasta ee kor ku qoran waa in midkiiba hal dokumenti oo aqoonsi ah aad markastaaba horay usoo qaadataa.



- **Si aad ugu baahato in hal jeer** oo kaliya aad tagto xarunta ServiceOntario isa soo diyaari oo waxyaabaha lagaaga baahan yahay la kaalay.
- **Dhammaan dukumentiyada oo dhan waa in ay ahaadaan kuwa asal ah** – footokoobi iyo kuwa la soo daabacayba ma qaadnayno.

Liiska 1 Caddeyn ah in aad tahay Muwaadin / OHIP-Sharciga aad Wadanka ku Joogto mid dooro:

Muwaadin Kanadiyan

- Baasaboor Kanadiyan oo aan waqtigii dhicin ama Baasaboor Kanadiyan oo waqtigiisa dhacay balse aan ka badnayn mudo shan sanno ah
- Shahaado Dhalasho oo saaray gobol Kanada ku yaalla ama dhul gaar u go'an (territory) (oo ku soo baxay Xeerka Qorshaha Muhiimka)
- Shahaado Kanadiyan oo Diiwaangelin Dhalasho Dibada ah
- Qoraal Caddeynaya in Lagugu Dhalay gobol ama dhul gaar u go'an Kanada
- Caddeyn ah Dhalasho Muwaadin Kanadiyan ah ama Shahaado ah in Dhalashada aad qaadatay (ha noqoto dukumenti warqad ama kaar, ma noqon karo warqad xusuus ah)
- Shahaado Sharci Indian (warqad ama kaar balaastiig ah)
- Diiwaangelin Indian Diiwaangashan (caddeyn)

Sharciga Degnaanshaha / Sharciga Wadanka lagu joogo

- Kaarka Degnaanshaha Rasmiga ama kaarka Degnaanshaha Rasmiga oo waqtigiisa dhacay balse aan ka badnayn mudo shan sanno ah
- Kaarka Aqoonsiga Sharciga Kanadiyaanka
- Caddeymo Degnaansho Rasmi ah (IMM 5292, 5688)
- Diiwaangelin Sharci (IMM 1000)

Sharciyo Degnaansho Kale

- Warqad ka socota Guddiga Qaxootiga iyo Laanta Socdaalka oo caddeynaysa in aad tahay Qaxooti ama aad tahay Shaqsi Dhoorsan
- Dukumentiga Sharciga Shaqsiga Dhoorsan
- Sharciga Degnaanshaha oo ku meel Gaar ah (xannibaadyo ayaa ku dabaqan)
- Warqadda Shaqada (caddeyn ah in waqti buuxa aad ka shaqayso gobolka Ontario ayaa loo baahnaan karaa)
- Qoraal caddeyn ah oo ka socd Laanta Jinsiyadda iyo Socdaalka Kanada oo sheegaya in aad xaq u leedahay oo aad dalban karto jinsiyadda Kanadiyanka sida hoos timaada qeybta 5.1 ee Xeerka Muwaadinnimada (Kanada)
- Qoraal caddeyn ah oo ka socd Laanta Jinsiyadda iyo Socdaalka Kanada oo sheegaya in aad xaq u leedahay oo aad dalban sharciga degnaanshaha rasmiga ee Kanada
- Diiwaangelin Caddeymo Dukumenti ku meel Gaar ah

Hal dukumenti waa in aad ka haysataa:

Liiska 1 - Caddeyn Muwaadinnimo ama OHIP- Sharciga aad Wadanka ku Joogto

Dukumenti caddeynaya in aad tahay muwaadin Kanadiyan ah ama haysta sharci kale oo aad xaq ugu yeellanayso in aad hesho caymiska caafimaadka ee gobolka Ontario.

Waxaan horey usoo qaadayaa: _____

Liiska 2 - Caddeyn Degnaansho

Mid dooro:

- Batantiga Baabuurta Ontario oo aan Dhacsanayn ama Batantiga Baabuurta oo ku meel Gaar ah (waa kaliya haddii sawir saaran yahay kaarka batantiga oo isla cinwaankiina ku qoran)
- Biilka (telfoonka guriga, kaybalka TV, biilka korontada, hydro, gaas, biyo)
- Warqaddaha koontada bankiga ee bishiiba mar la soo diro ee koontooyinka keydka ama jeegga (lama doonayo rasiid, buugga bangiga, warqaddo ama rasiidka mashiinka lacagta ee bangiga)
- Diiwaangelinta shirkadda (jeegga dabadiisa ama warqad ka socota loo shaqeyaha oo ku qoran warqadda shirkadda)
- Warqadda warbixiinta Dugsiga, kuliyaadda ama jaamacadda ama qoraalka buundooyinka
- Warqadda Manfacyada Canshuurta Dhallaanka
- Qiimeynta Canshuurta daqliga (ee ugu dambeeyay)
- Heshiis caymis (kan guriga, kireystaha, baabuur ama naf)
- Deynta guriga, kirada ama heshiiska guriga
- Ogolaanshaha Ontario ee Baabuur Wadida (taargo ama qeybaha gaariga)
- Biilka canshuurta guriga
- Warqad caddeyn ee Lacag Dhigid toos ee Ontario Works ama Barnaamijka Taageerada Naafada ee Ontario
- Warqadda Manfacyada Caymiska Shaqada ee la Bixiyay T4E
- Warqadda (Old Age Security T4A) (OAS) ama Warqadda Manfacyada Qorshaha Dhigaal-howlgabka Kanada T4A (P)
- Warqadda Qorshaha Keydka Diiwaangelinta Howl-gabka ee (RRSP), Diiwaangelinta Deeqda Daqliga Howl-gabka ee (RRIF) ama Qorshaha Keydka La Haanshaha Guri ee Diiwaangashan (RHOSP) oo ka timid xarumaha (bangiga, shirkaddaha lacagta haya, bangiyada kareedit unionka)
- Guddiga Caymiska iyo Amniga Goobta Shaqo Warqadda Manfacyada ee T5007
- Warqadda Qorshaha Howl-gabka Kanada ee aad bixiso
- Kaarka Sawirka Ontario oo aan Dhacsanayn

Hal dukumentu waa in aad ka haysataa:

Liiska 2 - Caddeyn ah in Ontario aad Degan tahay

Dukumentu ku qoran magacaaga iyo cinwaankaaga guriga ee aad degan tahay oo xaqiijinaya in degaankaaga koowaad uu ku yaallo gobolka Ontario.

Waxaan horey usoo qaadayaa: _____

Liiska 3 - Aqoonsiga wax Taageerayo

Mid dooro:

- Kareedit Kaar
- Batantiga Baabuurta Ontario oo aan Dhacsanayn ama Batantiga Baabuurta oo ku meel Gaar ah
- Kaarka Sawirka Ontario oo aan Dhacsanayn
- Kaarka Aqoonsiga Sharciga Kanadiyaanka
- Caddeyn ah Shahaada Jinsiyada Kanadiyan (kaarka balaastigga)
- Shahaadada Sharciga Indian (warqad ama kaarka balaastiga)
- Caddeymo Degnaansho Rasmi ah (IMM 5292) (kaliya haddii saxiix uu ku yaallo)
- Aqoonsiga shaqada hadda
- Shatiga ururka xirfadlayaasha ee hadda
- Kaarka Ammaanka Duqowda
- Ogolaanshaha Ontario ee Baabuur Wadida (qeybta taargaha)
- Baasaboorka (Kanadiyanka ama mid shisheeye)
- Kaarka Degnaanshaha Rasmiga (kaliya haddii saxiix uu ku yaallo)
- Kaarka Aqoonsiga Ardayga
- Kaarka Unionka

Hal dukumentu waa in aad ka haysataa:

Liiska 3 - Aqoonsiga Taageeraya

Waa dukumentu ku qoran magacaaga iyo saxiixaaga.

Waxaan horey usoo qaadayaa: _____

Nagala soo Xiriir

Qaar ka mid ah xarumaha ServiceOntario waxay bixiyaan in balan lagu qabto. Goorta aad diyaar noqoto in aad dalbato kaarkaaga caafimaadka cusub ee Ontario oo sawir leh waxaad naga soo booqan kartaa bogga internetka ee [ServiceOntario.ca/Appointment](https://www.serviceontario.ca/Appointment) ama naga sii wac qatka bilaashka ah ee **1-888-376-5197** si aad u ogaato haddii xarumaha ku dhexyaalla xaafaddaada ay bixiyaan in balan lagu qabto.

Meelaha kuu dhow ee xarumaha ServiceOntario waxaad booqan kartaa boggeena internetka, ama telfoonkaaga gacanta, waa [ServiceOntario.ca/FindServices](https://www.serviceontario.ca/FindServices).

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaq u la'haanshahaaga, fadlan booqoo [ServiceOntario.ca/HealthCard](https://www.serviceontario.ca/HealthCard) ama naga soo wac:

Wicid Bilaash ah (Kanada): **1-800-267-8097**

Wicid Bilaash ah ee TTY (Kanada): **1-800-268-7095**

Naga raadi [ServiceOntario.ca](https://www.serviceontario.ca)